Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah

# الجريدة الرسمية

# Official Bulletin

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 11aad | Muqdisho, APRIL 2024 | Lr. 2 |
|---|---|---|

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## FEBRUARY-MARCH

# 2024

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 153** **Taariikh: 16/03/2024**

OPM - EXIT
20 MAR 2024
XRW - BIXIT

## XEER: SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), iyo (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WQM&HDH/XW/184/2023, ee ku Taariikheysan 06/04/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqaalaha;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay leeyahay meelmarinta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

<u>**Qodobka 2aad**</u>

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqaalaha loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta

<u>**Qodobka 3aad**</u>

**Dhaqangal**

Siyaasaddan Qaran waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-29-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga &
Horumarinta Dhaqaalaha
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Planning, Investment and Economic Development
Office of the Minister

**Ref: WQM&HDH/XW/ 184 /2023** **Date: 06/04/2023**

**Ku:** **Ku: Ra'iisul Wasaaraha XFS**
MUQDISHO, SOMALIA

**UJEEDDO: SOO GUDBIN SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxa ay, halkan si rasmi ah, kuugu soo gudbinaysa **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta**, si Golaha Wasiirrada loogu gudbiyo loona meel mariyo.

Mudane Ra'iisul Wasaare, baahi weyn ayaa loo qabaa meel marinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** taas oo ujeedku yahay sidii sare loogu qaadi lahaa isla xisaabtanka, hufnaanta iyo sare u qaadista saameynta togan ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda horumarinta dalka. Sido kale, Siyaasadda ayaa guud ahaan sare u qaadi doonta ku dhaqanka Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladdad Federaalka iyo bahda horumarinta oo dhammantood ku wada howlan horumarinta dalka.

Mudane Ra'iisul Wasaare, Wasaaraddu waxa ay codsaneysaa in ajandaha Golaha Wasiirrada ee ugu horreeya lagu daro **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta.**

Innga guddoon salaan iyo qaddarin diirran.

**Mahadsanid,**

Mohamud

**Xil. Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)**
Wasiirka
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha

*Address: Hussein Elabe Fahie Building Afgooye Road-KM 5, Mogadishu, Federal Republic of Somalia.*
*Email: info@ mop.gov.so, Website: http://www.mop.gov.so*

**Jamhuuriyadda Fedeeraalka Soomaaliya**

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH)**

**Waaxda Kormeeerka iyo Qiimeeynta**

# Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta

Maarso 2023

**SOO GAABINNO**

| | |
|---|---|
| AfDB | Bangiga Horumarinta Africa |
| DAC | Guddiga Kaalmada Horumarinta |
| FGS | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| FMS | Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka |
| KM | Maareynta Aqoonta |
| M&E | Kormeerka iyo Qiimeynta |
| WQM&HDH | Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha |
| QHQ | Qorshaha Horumarinta Qaranka |
| NGOs | Hay'adaha aan Dowliga Ahayn |
| NIMES | Hannaanka qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta isku xiran |
| OECD | Ururka Iskaashiga Horumarinta Dhaqaalaha |
| ODA | Kaalmada Horumarinta Rasmiga ah |
| SMART | Cad, la Cabbiri Karo, La Gaari karo, Waaqici ah Misna Xaddidan |
| ToR | Shuruudaha tix-raaca |
| PFM | Maareynta Maaliyadda Dowladda |
| WW&H | Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha |

## TUSMADA

**QEEXITANNO** .......... 3

**1. HORDHAC** .......... 5

1.1 EEGISTA JAWIGA GUUD .......... 5
1.2 GUULAHA DHOWAN LA GAARAY .......... 6
1.3 CAQABADAHA TAAGAN .......... 6
1.3 DABBAQISTA SIYAASADDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA .......... 7

**2. UJEEDKA, MABADI'IDA. IYO BAAXADDA SIYAASADDAN** .......... 8

**2.1 UJEEDKA SIYAASADDA** .......... 8

2.2 MABAD'IIDA GUUD .......... 8
2.3 BAAXADDA .......... 10

**3. QAAB-DHISMEEDKA FULINTA** .......... 10

3.1 QAAB-DHISMEDKA SHARCIGA .......... 10
3.2 FULINTA, KORMEERKA IYO DIB-U-EEGISTA .......... 11

**4. WADA SHAQEYNTA HAY'ADAHA** .......... 11

4.1 GOLAHA SHACABKA IYO GOLAHA AQALKA SARE .......... 11
4.2 XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA IYO GOLAHA WASIIRRADA .......... 12
4.3 WASAARADDA QORSHEYTNA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA (WAAXDA KORMEERKA IYO QIIMEYTA) .......... 12
4.4 WASAARADAHA MAALIYADDDA (HEER FEDERAAL IYO HEER DOWLAD GOBOLEED). .......... 13
4.5 WASAARADAHA, WAAXYAHA IYO HAY'ADAHA (WW&H) FEDERAALKA AH .......... 13
4.6 WASAARADAHA QORSHEYNTA EE DOWLAD GOBOLEEDYADA (WAAXYAHA MAS'UULKA KA AH HOWLAHA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA) .......... 14
WAAXDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA AYAA; .......... 14
4.7 WASAARADAHA, WAAXYAHA IYO HAY'ADAHA (WW&H) HEER DOWLAD GOBOLEED; .......... 15
4.8 DOWLADAHA HOOSE, GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA .......... 15
4.9 HAY'ADAHA AAN DOWLIGA AHEYN .......... 16
***4.9.1 Ururada Bulshada Rayidka ah, Bahda Horumarinta iyo Ganacsatada;*** .......... *16*
4.10 QAAB DHISMEEDKA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA QARANKA .......... 16
4.11 MAALIYADDA .......... 17

**5. SHURUUDAHA SIYAASADDA** .......... 18

5.1 SHURUUDAHA KORMEERKA .......... 18
5.2 SHURUUDAHA QIIMEYNTA .......... 19
***5.2.2 Heerarka Qiimeynta*** .......... *21*
5.3 SHURUUDAHA XIRIIRKA DADWEYNAHA IYO WARBIXINNADA. .......... 22
***5.1.1. Istiratiijiyadda Xiriirka Dadweynaha*** .......... *22*
***5.3.2 Shuruudaha Warbixinnada*** .......... *22*
***5.3.3 Qaab-dhismeedka Warbixinnada*** .......... *22*
5.4 BARASHADA IYO MAAREYNTA AQOONTA .......... 23
5.5 SHIRKADAHA IYO XIRFADLEYDA MADAXA BANNAAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA .......... 23
5.6 U HOGGAANSANANTA SIYAASADDAN .......... 24
***5.6.1 Faa'iidada iyo Dhiirigelinta*** .......... *24*
***5.6.2 Xayiraad*** .......... *24*

**6 HORUMARINTA KARAANKA** .......... 25

7. SAAMEYNTA SIYAASADDAN EE LA FILAYO .......... 25

**QEEXITANNO**

**Isla Xisaabtan (Accountability):** Waajibaadka lagu muujinayo in howlaha mashariicda loo qabtay si u hoggaansan xeerarka iyo heerka tayo ama warbixinta howlahaas loo soo gudbiyay si xaqiiqo ah, sax ah oo ku aaddan wax-qabadka.

**Hay'ad (Agency):** Isticmaalka ereygan ee dukumiintigan waxa loola jeeda hay'ad dowladeed sida hay'adaha ay dowladdu mamausho, ama ay dowladdu maalgeliso, shirkadaha dowliga ah iyo hay'adaha kale ee bixiya adeegga dadweynaha, badeecooyinka ama adeegyada kale.

**Hanti dhowris (Audit):** Howlo madax-bannaan, xaqiijinayana ujeedooyin la dejiyay si sare loogu qaado tayada howl-gallada hay'adaha. Waxa ay ka cawineysa hay'adaha gaarista ujeeddooyinkooda iyaga oo lagu soo dabbaalayo nidaam habeysan, la dhowro si loogu qiimeeyo ama loogu hagaajiyo waxtarka maareynta khataraha, xakameynta howlaha iyo habsami u socodka howlaha.

**Waxtar (Effectiveness):** Xaddiga lagaga guuleystay barnaamijyada horumarineed, ama la filayo in looga guuleysto, iyada oo la eegayo ahmiyadaha howlahaas.

**Beekhaamin (Efficiency):** Tallabooyin lagu xaqiijinayo kheeyraadka dhaqaale ee la geliyo (deeqo, khibrad ama muddo) mashariicda loona beddelo natiijo wax-ku-ool ah.

**Qiimeeyn (Evaluation):** OECD/DAC ayaa ku qeexa qiimeynta "tallabooyin is xig-xiga lagana leeyahay ujeeddooyin lagu qiimeynayo wax tarka mashariic socota ama dhammaatay, barnaamij ama siyaasad, ujeedka,fulinta iyo natiijada ka dhalata. Ujeedku waa in la xaqiijiyo ku-habboonaanta iyo gaarista ujeedooyinka mashariicda, hufnaanta iyo wax tarka horumarka, saameynta iyo joogteenta guulaha mashariicda. Qiimeyn waa in ay horseeddaa helitaanka warbixinno sugan oo la adeegsan karo, kuwaas oo casharada laga bartay ay u adeegsan karaan go'aannada xiga deeq-bixiyaasha iyo dalalka deeqaha la siiyay" (OECD, 2000).

**Saameynta (Impacts):** Saameynta togan ama taban ee aas-aasiga ah ama aan aas-aasiga aheyn ee ka dhalato howlaha horumarinta, si toos ah iyo si dadban, loogu talagalay ama aan loogu talagalin.

**Tilmaame (Indicator):** Arrimaha tiro ama tayo ahaan ama isbeddelada tusmeynaya hannaan sahlan ama lagu kalsoonaan karo kaas oo cabbiraya guulaha, soo shaac bixinayana isbeddelada ku dhacaya howlaha ama naga cawinaya qiimeynta wax-qabadka bahda horumarinta.

**Maareynta Natiijooyinka (Managing for results):** Istiraatiijiyad maareynayo lagu bar-tilmaameedsanayo wax-qabad, iyo gaadhista wax-soo-saarka, iyo saameynta. Isaga oo ka hadlaya Maareynta Natiijooyinka, Jonathan, ayaa yiri; " Ujeedka ugu dambeeya ee maareynta natiijooyinka waa in ay horseeddaa hannaan habeysan si loo hagaajiyo sida ay dowladdu u howl-gasho: in la horumariyo yoolal iyo ujeeddooyin lagu mareynayo natiijooyinka la filayo, in lagu habeeyo siyaasadaha iyo barnaamijyada dowladda si waafaqsan natiijooyinka dhabta ah, in miisaaniyadda lagu saleeyo sidii lagu gaari lahaa natiijooyinka la rabo in la gaaro, in la asteeyo siyaabaha lagu hagaajin karo wax-qabadka barnaamijyada, iyo in lagu war-geliyo cidda ay khuseyso xaddi intee la'eg ayaa lagaga guuleystay gaarista yoolalka iyo

ujeeddooyinkaas.

**Kormeer (Monitoring):** OECD/DAC waxa ay ku qeexdaa kormeer "shaqo socota taas oo adeegsanysa hannaan xog uruurin ku aaddan tilmaamaha si looga siiyo maamulka iyo daneeyayaasha mashariicda socota ee horumarineed, warbixino oo ay ka mid ka yihiin xaddiga guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo horumarka laga gaaray adeegsiga lacagaha loo qoondeeeyay mashariicda" (OECD, 2002).

**Miro (Outcome):** Saameynta laga gaaray muddada dhow (short-term) ama muddada dhexe (medium-term) ee wax-soo-saarka howlaha mashariicda.

**Wax-soo-saar (Outputs):** Wax-soo-saarka, raasumaalka ama adeegyada ka soo baxo mashariicda horumarineed, oo ay ka midka tahay is-beddellada ka dhasha howlaha kuwaas oo khuseeya gaarista natiijada.

**Wax-qabadka (Performance):** Heerarka ay howlaha horumarineed ama bahda horumarinta ay u raacaan shuruudaha, heerarka tayo, tilmaamaha la dejiyay ama guulaha natiijada wax-qabadkooda si waafaqsan yoolalka iyo qorsheyaasha degsan.

**Talooyin (Recommendations)**: Soo jeedimaha looga gol-leeeyahay sare u qaadista wax-tarka, tayada, ama heerka hufnaanta howlaha horumarineed, dib-u-qaabeynta ujeeddooyinka, iyo dib-u-qoondeynta lacagaha.Talooyinku waa in ay ku xiranyihiin gunaanadka.

**Natiijo (Results):** Wax-soo-saarka, natiijada ama saameynta (loogu tala galay ama aan loogu tala gelin, togan ama taban) ee howlaha horumarineed.

**Dib-u-eegis (Review):** Waa qiimeynta wax-soo-saarka ama horumarka laga gaaray fulinta siyaasad, qeyb-dhaqaale, hay'ad, barnaamij ama mashruuc loo sameeyo muddo xilliyeed ama si lama filaan ah. Si ka duwan Qiimeeynta, oo aalaba xoogga saarta natiijada (natiijada iyo saameynta) howlaha, dib-u-eegista waxa ay xoogga saareysa arrimaha la xiriira howl-gallada, sidaa daradeed waxa ay si dhow ugu xiran tahay howlaha kormeerka. Dib-u-eegis waxa ay qaab-dhismeed ahaan noqon kartaa dhacdo xilliyeysan halkaas oo looga hadlo wax-qabadka howl-gallada daneeyayaasha muhiim ka ah, sida kulammada sanadlaha ah ee sida wadajirka ah dib-loogu-eego caafimaadka, waxbarashada, biyaha IWM.

**Joogteynta (Sustainability):** Sii wadista ka faa'iideysiga howlaha horumarineed kadib marka mashariicda mugga leh ee kaalmada horumarinta la soo gebo-gebeeyo.

## 1. HORDHAC

Iyada oo la raacayo gaarista Dowladda Federaalka Soomaaliya ay gaatay nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta ku saleysan natiijada (Result-based Monitoring and Evaluation—RBM) waxa soo xoogeysatay baahida loo qabo horumarinta Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxqabadka mashariicda dowladda, barnaamijyada iyo siyaasadaha.

Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay qeexeysaa kaalimaha iyo mas'uuliyadaha Wasaaradaha Dowladda, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H), hay'adaha fuliya mashariicda, oo ay ka midka yihiin hay'adaha aan dowliga aheyn ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, Qaramada Midoobay, iyo bahda horumarinta kale, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo ururada bulshada ay ku leeyihiin nidaamka kormeerka iyo qiimeynta taas oo dejineysa shuruudaha arrimaha la qiimeynayo, qiimeyntana sameeya, dhiraandhiriya, isla markaasna baahiya xogta qiimeynta si loogu adeegsado xogtaas go'aan qaadashada heerka sare.

Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeyntu waxa ay xaqiijineysaa dadaallada dowladda ee lagu doonayo in si xirfadeysan loog maareyo kheyraadka dadweynaha isla markaana la xaqiijiyo isla xisaabtan, hufnaanta iyo in la hagaajiyo tayada adeeeg bixinta la siinayo bulshada Soomaaliyeed.

### 1.1 Eegista Jawiga Guud

Kadib burburkii dowladdii dhexe sanadkii 1991kii, Soomaaliya waxa ay wajaheysay xasarado siyaasadeed, abaaro, macluul iyo amni darro in ka badan 30 sanadood. Burburka dowladdii dhexe ayaa horseeday horumarin la'aanta ama burburka dhamaan kaabeyaashii dhaqaalaha ee dalka. Hay'adaha gargaarka ayaa isku dayaya in ay buuxiyaan kaalintii adeeg bixinta ee dowladdi burburtay.

Tan iyo sanadkii 2000, iyada oo garab laga helayay bahda horumarinta iyo hormuudka bulshada, nidaam dowlad kumeel gaar ah ayaa la unkay, kaas oo sare u qaadday xasilloonida iyo soo kabashada uu dalka ka soo kabanayay qaskii siyaasadeed. Labaatankii (20) sano ee ugu dambeysay, dalka Soomaaliya ayaa ka sameeyay horumar lixaadle dhinacyada dowlad iyo hay'ad dhiska, ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed, kana gaaray guulo la dagaallanka kooxaha xagjirka ah, sare u kac ku yimid kobaca dhaqaalaha, iyo in la hagaajiyay nidaamka maamulka dowliga ah.

Si kastaba ha ahaate, waxaa weli jiro mugdi ku gadaaaman kala caddeynta iyo nidaam sharciyeysan oo qeexaya xiriirka wadashaqeyn ee Dowladda Federaalka ah iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, maadaama nidaamka Federaalka ah ee la qaatay yahay nidaam dowli ah oo ku cusub dalka.

Iyada oo la eegayo warbixinta Bangiga Adduunka, saboolnimada ayaa ah mid ku baahsan Soomaaliya iyada oo ku dhowaad boqolkiiba toddobaatan (70%) bulshada Soomaaliyeed ku noolyihiin in ka hooseysa heerka saboolnimada iyo in boqolkiiba sagaashan (90%) ku noolyihiin saboolnimo dhinacyo badan taas oo ay ka midka tahay caruur tabaaleysan iyo waxbarasho la'aanta dadka waweyn, biyo la'aan, nadaafad iyo koronto la'aan.[1]

Marka la eego qulqulka deeqaha, Soomaaliya waxa ay ka kala heshay dunida 2.1 (2020) iyo 1.2 (2021) bilyan doollar oo ah

[1] Somalia Economic Update: Investing in Social Protection to Boost Resilience for Economic Growth, World Bank Report (November, 2022) Accessible at https://documents.worldbank.org/en/publication/documents-reports/documentdetail/099645010242215445/p17502402429f50e708a6408e3872dbb193

Kaalmada Horumarinta Rasmiga ah (ODA). Sanadkii 2020, kaalmada ku wajahan horumarinta dalka ayaa gaaray 23% (1 bilyan oo doollar) marka la bar-bar dhigo sanadkii 2019 oo ay aheyd 854 milyan oo doollar). Sare u kacan kaalmada waxaa inta badan horseeday kaalmada lixaadka leh ee ka timid Bangiga Adduunka iyo Dowladda Jarmalka.[2]

In kasta oo ay kaalmada dibadda ee horumarinta iyo gargaarka ay waxtar u leeyihiin dadka u baahan adeegyada aas-aasiga ah, dib-usoo kabashada iyo kobaca dhaqaalahana ay kaalin mug leh ku leedahay, isla markaana ay horseeddo dib-u-dhiska hay'adaha dowliga ah, waxtar yar ayey ku leedahay amaba kumaba lahan marka la eego horumaritna siyaasadda dalka, gaar ahaan dhinacyada sarreynta sharciga, dowladnimada iyo hagaajinta bixinta adeegyada guud ee dadweynaha.

Xasillooni darrida siyaasadda kaliya ma horseedin isbeddelka hoggaanka sare ee Wasaaradaha ama Hay'adaha kala duwan ee dowladda balse waxa ay sidoo kale horseedday gaabis ku yimid dedaallada iskuduwida ee kormeerka iyo qiimeynta mashariicda, barnaamijyada, iyo siyaasadaha dowladda iyo kuwa hay'adaha gargaarka.

Maqnaanshiyaha cabir waxqabad ayaa horseeday musuq-maasuq baahsan, lacag lunsashada, nuglaansho baahsan iyo barakaca dadka ay ka soo barakacayaan deegaannadoodii.

### 1.2 Guulaha Dhowan la gaaray

Marka laga yimaado in dalku uu wajahayo caqabado khatartooda leh iyada oo lagu gudo jiro hubanti la'aanta uu keenay caabuqa COVID19, dhibaatada ayaxa, iyo sare u kaca ku yimid qiimaha badeecyooyinka ee suuqyada caalamiga ah, haddana waxaa jira rajo iyo fursado dib-loogu qaabeyn karo mustaqbalka dalka, lagu hagaajin karo dowladnimada, laguna bixin karo adeegyada dadweynaha iyada oo la marayo nidaamka isla xisaabtanka iyo hufnaanta.

Guulaha dhowaan la gaaray waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Qorshaha 8$^{aad}$ ee Horumarinta Qaranka (2016) oo horseeday diyaarinta Qorshaha 9$^{aad}$ ee Horumarinta Qaranka .
- Fulinta mashruuca tabar-siinta dowladda (Capacity Injection Project) kaas oo ka taageeray dowladda dhanka hagaajinta hay'adaha Dowladda Federaalka ah, sida horumarinta siyaasadaha iyo xeerar cusub.
- Dib-u-soo nooleeynta iyo awood siinta Hay'adda Tirakoobka Qaranka iyo Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta WQM&HDH, oo ay ka mid yihiin qaab-dhismeedka istiratiijiga ah iyo siyaasado cusub.
- Horumarinta Siyaasadaha Nidaaminta Maareynta Maaliyadda Dowladda
- Dastuurka ku-meel gaarka ah ee Federaalka iyo Dastuurrada Dowlad Goboleedyada.

### 1.3 Caqabadaha taagan

In kasta oo ay jiraan dadaallo xooggan oo laga sameeyay adkeynta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta casriga ah, haddana weli waxaa jira caqabado iyo arrimo ku hor-gudban kuwaas oo u bahaan in wax laga qabto, waxaana ka mid ah;

**Dhaqanka Kormeerka iyo Qiimenta oo liita (Weak Monitoring and Evaluation culture):** Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta waa mid ku cusub Soomaaliya baahida loo qabana inta badan waxa dhaliya deeq-bixiye yaasha halka hay'adaha dowliga ah aaney weli si buuxda ugama mid dhigin nindaamka kormeerka iyo

[2] Aid Flow in Somalia (June, 2021), Report, accessible at https://aims.mop.gov.so

qiimeynta siyaasadahooda, barnaamijyadooda iyo mashariicda ay hir-galiyaan. Sidaa daradeed, dadaal yar ayaa lagu bixiyaa amaba lagumaba bixiyo in maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta loo adeegsado go'aan qaadashada hay'adaha, in la horumariyo siyaasado ku dhisan xaqiiqooyin iyo in la'is waafajiyo diyaarinta miisaaniyadda, kheyraad u qoondeynta iyo maclumaadka laga helay kormeerka iyo qiimeeynta

2) **Nidaamka iyo Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta oo Liita (Weak M&E system and structures):** Nidaamka iyo qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeeynta ee haatan jira ayaa ah mid liita, kala baahsan iyo in ay jirto iskuduwid la'aan ka dhex jirta hay'adaha iyo heerarka farsamo taas oo caqabad ku ah soo saarista warbixinada kormeerka iyo qiimeynta. Kama dhex jiro hanaan kala warqaadasho cad iyo nidaam is-waafaqsan ee isku xira hay'adaha Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada taas oo hoos u dhigtay amaba hor-istaagtay xogta kormeerka iyo qiimeynta, taas oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee uruurinta, maareynta, baahinta xogta la helay si guud ahaan loo isticmaalo.

   Inta badan nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ee ka jira heer Federaal ama heer Dowlad Goboleed ma'ahan kuwo ku saleysan natiijo. Waxa ay diiradda saran howlaha iyo waxqabadka. Tani waxa ay saameyn taban ku leedahay baaxadda xogta la soo uruuriyay, tayada iyo helitaanka xogtaas si ay qeyb uga noqoto diyaarinta siyaasadaha ayaa ka mid ah liidnaanta nidaamka kormeer iyo qiimeyn ee haatan jira.

3) **Karaanka Hay'adaha oo Liidata (Weak Institutional Capacities):** Karaanka hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta ee Dowladda Federaalka ah iyo kuwa Dowlad Goboleedyada ayaa ah mid liidata si ay usoo saaraan, baahiyaan isla markaana sare ugu qaadan adeegsiga warbixinada kormeerka iyo qiimeynta. Malahan khubaro iyo shaqaale xirfadleyaal ah oo kaga shaqeeya howlaha kormeerka iyo qiimeynta, qaab-dhismeedka iyo siyaasado lagu hago kormeerka iyo qiimeynta mashariicda, barnaamijyada iyo siyaasadaha. Ku dhowaad dhammaan hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta malahan khubaro ka taageerta uruurinta xog tayo leh waxaana sidoo kale ka maqan kaabeyaasha iyo agabka sida, xog-keydiye yaasha (servers), software shati leh oo lagu soo saaro istaatistikada. Caqabadda kale ee weyn waa in hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta aaney laheyn nidaam qaran oo laf-dhabar u noqon laheyd kormeerka iyo qiimeynta howlaha dowladda iyo daneeyayaasha kale. Dhaqaale yarida ayaa dowladda ka hor taagan in ay hesho hay'ado kormeer iyo qiimeyn oo waxtar u leh, iskuduwidda heerarka farsamo ee hay'adaha, xog tayo leh si loo gaaro xaddi baaxad leh iyo helitaan yarida xogta laga soo uruuriyay iyo midda lagu keydiyay xog-keydiyeyaasha daneeyayaasha kala duwan.

4) **Qaab-dhismeed Sharci oo Liita (Weak Legal Framework):** In kasta oo ay leedahay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, oo mas'uul uga ah iskuduwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta, waxaa jirta baahi loo qabo nidaam qaran oo hago qaab-dhismeedka kaas oo saldhig u noqdo iskuduwidda dhismaha iyo howlaha kormeerka iyo qiimeynta.

### 1.3 dhaqan galinta Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta

Kormeerka iyo Qiimeeynta ayaa si lixaadle u noqonaya mid ay wada aqbalaan dowladaha iyo hay'adaha aan dowliga aheyn kuwaas oo ku howlan siyaasadaha dadweynaha, barnaamijyada iyo mashariicda kuwaas oo muwaadiniinta u muujinaya natiijooyin. Marka lagu daro, waxaa jira rabitaan buuxa oo ku aaddan qaadashada go'aanno ku dhisan xaqiiqooyin ee adeegga dadweynaha. Sidaa daraadeed, Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay kaabeysa siyaasadaha kale ee dowladda si loo helo warbixin waqtiyeysan iyo in maclumaadka joogtada ah ee ku saleysan

go'aannada dhabta ah ee ku aadan gaarista natiijo miro dhal ah.

In kasta oo Dastuurka kumeel gaarka ah iyo dastuurkii 1979^kii aysan si cad u xuseynin kormeerka iyo qiimeynta, Siyaasaddan Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeeynta waxa ay ku qottontaa qodobbada 10, 11 iyo 32 ee dastuurka kumeel gaarka ah. Qodobbadan waxa ay ku dhisan yihiin mabadi'da soo socota;

1) **Sharafka iyo Sinaanta Bini'aadamka (Human Dignity and Equity):** Marka la eego cutubka labaad (2^aad) ee dastuurka kumeel gaarka ah, waxa uu xusayaa in dowladdu ay waajib ku tahay xaqiijinta dejinta xeerar, siyaasado iyo barnaamijyo u adeegayo mabadi'da sinaanta.
2) **Xuquuqda Helista Maclumaadka (Right to Access Information):** Sida ku xusan qodobka 32^aad ee dastuurka kumeel gaarka ah, muwaadiniinta waxa ay xaq u leeyihiin helitaankaxogta ay hayso dowladdu. Sidaa daradeed, waa in lagu dadaala hufnaan si loo siiyo dadweynaha xog waqtiyeysan, la heli karo misna dhab ah kaas oo ku saabsan siyaasadaha dowladda, barnaamijyada iyo mashaariicda.

## 2. Ujeedka, Mabadi'ida. Iyo Baaxadda Siyaasaddan

### 2.1 Ujeedka Siyaasadda

Siyaasaddan waxa ay kobcin doontaa waxqabadka dowladda iyada oo loo marayo abuurista nidaam kormeer iyo qiimeyn iyo in la lagu hago howlaha kormeerka iyo qiimeynta heerka ugu sarreeya guud ahaan hay'adaha Dowladda Federaalka ah si loo fududeeyo soo saarista iyo isticmaalka warbixinno si loo gaaro go'aan qaadasho hufan iyo isla xisaabtan marka la fulinayo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda guud. Haddaba si loo gaaro ujeeddooyinka, siyaasaddani waxa ay leedahay ujeeddooyinka istiraatiijigga ah ee soo socda;

1) In la qeexo heerka ugu yar iyo shuruudaha si loo maareyo hanaanka kormeerka iyo qiimeynta ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda guud, kuwaas oo waafaqsan mabad'ida, xeerarka iyo heerarka tayo ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
2) In la aas-aaso isla markaana la how-geliyo Nidaamka Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta, kaas oo leh farsamo wax-tar leh si loogu adeegsado warbixin joogto ah loona gaaro natiijooyinka iyo yoolka Qorshaha Horumarinta Qaranka.
3) In la dhiso karaanka hay'adaha qaran ee kormeerka iyo qiimeynta si loo fududeeyo howl-gelinta hanaanka qaran ee kormeerka iyo qiimeynta loona gaaro la socodka qiimeyn wax-tar leh iyo warbixin ku aaddan guulaha laga gaaray fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka, siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda. Hanankaas ayaa noqon doono mid hufan oo horseeda siyaasado, barnaamijyo iyo mashariic ay ka faa'iideystaan shacabka Soomaaliyeed.
4) In la dhiirigeliyo hanaanka go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada dhabta ah loona adeegsado heerarka kala duwn ee dowladda iyada oo loo marayo wadiiqada xiriirka dadweynaha, baahinta iyo isticmaalka natiijooyinka kormeerka iyo qiimeeynta si loogu xoojiyo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda wax-tarka leh.
5) In la qeexo qaab-dhsimeedka, kaalimaha iyo mas'uuliyadaha hay'adaha kala duwan ee ku howlan kormeerka iyo qiimeeynta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda dowladda.

### 2.2 Mabad'iida Guud

Si loogu guuleysto ujeedooyinka Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta, shaqada kormeerka iyo qiimeynta iyo

curfiga dalka waa in ay hagaan mabad'iida soo socota:

1) **Lahaanshaha iyo Wadashaqeynta (Ownership and Collaboration):** Hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay xaqiijiyaan ka qeybgelinta daneeyayaasha marka la qorsheynayo, la hirgelinayo iyo marka la asteynayo natiijada siyaasadaha, barnaamijka iyo mashariicda guud, taas oo wax tar u leh bulshada Soomaaliyeed. Howlaha kormeerka iyo qiimeynta wadajirka ah oo ee qayb ka yihiin daneeyayaasha ayaa la dhiirigelinaya si loo gaaro heerka ka qeyb qaadashada tan ugu sarreysa, wadajirka, lahaanshaha iyo fulinta mashariicda. Howlaha kormeerka iyo qiimeynta waxaa loo qabanaya si furan, hufan, laga wada tala-geliyay, lagana wada qeybgeliyay daneeyayaasha horumarinta ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.
2) **Isla xisaabtan iyo Daah-furnaan (Accountability and Transparency):** Dhamaan deeeqaha loo asteeyay horumarka waa in la xisaabiyaa, natiijada ka soo baxdana lala wadaago inta ay khuseyso qaab ay si fudud ugu heli karaan warbixinnada. Wasaaradaha Dowlada Goboleedyada, waaxyaha iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa lagula xisaabtami doona waxqabadka iyo filashada mashariicda sida ay muujineyso warbixinnada hannaanka kormeerka iyo qiimeynta. Waa in dadweynaha lala wadaago warbixinno ku filan oo ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda guud iyo sidoo kale maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta ee la xiriira howlahaas.
3) **Maareynta Natiijooyinka iyo Barashada (Managing for Results and Learning):** Hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay dhiirigeliyaan maareynta ku saleysan natiijada si loo xaqiijiyo in siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ay yihiin kuwo ku qottoma natiijooyinka laga rabo ayaa dadweynaha lagula wadaagi doona si cad oo muuqata. Kormeerka iyo Qiimeynta waa in ay hagtaa warbixinnada ay dadka isticmaalayaan iyo warbixinnada ay u baahanyihiin, oo ay ka midka yihiin siyaasiyiinta, fuliye-yaasha, iyo shacabka Soomaaliyeed. Warbixinnada ka dhasha kormeerka iyo qiimeynta waa in si waqtiyeysan , la gaari karo lana isticmaali karo loo diyaariyo si ay u hagto go'aannada siyaasdaha barnaamijyada.
4) **Qiimaha lacagta iyo kafaaiidaysiga (Value for Money and Utility):** warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta waa in ay fududeeyaan go'aan ka qaadashada in siyaasad, barnaamij ama mashruuc uu yahay mid waxtar leh marka laga eego lacagta ku baxday, iyo waxa lagu qabtay ama guulaha laga gaaray in meesha laga saaro wax-qabad la'aanta iyo ku noq-noqoshada hal-mashruuc oo la fuliyo. Marka la billaabayo ama la qabanayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta, waa in uu jiraa niyad wanaag ku aaddan in natiijada, falanqeynta, gunaanadka iyo talooyinka warbixinnada loo isticmaalo go'aannada masiiriga ah ee mashariicda. Isticmaalka natiijada kormeerka iyo qiimeynta waa in ay ka muuqataa waxtarka ku habboon ee waqtiyeysan oo ay ka geysaneyso geeddi-socodka go'aan qaadashda ku saleysan warbixinnada la hayo, isla xisaabtanka ku aaddan natiijada iyo barashada. Natiijada iyo in casharrada laga bartay kormeerka iyo qiimeynta waa in lala wadaago inta ay khuseyso, taas oo horseedeyso jawaab celin wax-ku-ool ah.
5) **Nidaamka weydiimaha, Anshaxa iyo Hufnaanta (Systematic Inquiry, Ethics and Integrity):** Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay u hoggaansamaan heerarka farsamo ee ugu sareeya, qaabka wada xiriirka iyo hanaanka xaqiijinta iyo in warbixin dhameystiran la baadi-goobo marka la qabanaayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta si dadka ay u fahmaan, u fasirtaan si dhab-ahna ugu adeegsadaan warbixinadaas. Si taxadar leh waa in looga fiirsadaa adeegsiga tiknoolojiyadda soo baxeyso ee loo adeegsado nidaamka qiimeynta. Si loo xaqiijiyo isticmaalka iyo kalsoonida lagu qabo natiijooyinka kormeerka iyo qiimeyta, curfiga howlaha kormeerka iyo qiimeynta ay adeegsadaan hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in loogu kuur galaa si dhex-dhexaadnimo leh isla markaana u hoggaansan heerarka caalamiga ah, xeerka anshaxa ee nidaamka xog-uruurinta, falanqeynta, warbixinnada iyo ilaalinta xogta ay bixinayaan dadweynaha.

### 2.3 Baaxadda

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxaa lagu dhaqayaa dhammaan WW&H Dowladda Federaalka ah iyo kuwa Dowlad Goboleedyada iyo sidoo kale bahda horumarinta ka taageerto Soomaaliya iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee taageera ama ka fuliya dalka siyaasado, barnaamij iyo mashariic.

Siyaasadda ayaa dulmar ka bixineysa qaab-dhismeedka nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dalka, shuruudaha ugu yar ee laga doonaayo hay'adaha ku howlan kormeerka iyo qiimeynta, kaalinta iyo mas'uuliyadaha daneeyayaasha (Dowliga iyo kuwo aan dowliga aheyn) ee ku howlan fulinta siyaasadaha, barnamijyada iyo mashaariicda dalka. Siyaasaddan ayaa loo adeegsan doona in lagu fududeeyo la socodka, qiimeynta iyo warbixinnada la xiriira fulinta iyo horumarka laga gaaray Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo guulaha laga gaaray ballan-qaadyada qaran ee ay gasho Dowladda Federaalka Soomaaliya ee heer gobol iyo heer caalami sida yoolalka Horumarinta Waarta ee loo yaqaanno (Sustainable Development Goals (SDGs).

## 3. Qaab-dhismeedka Fulinta

Si loo gaaro ujeeddooyinka guud iyo shuruudaha lagu xusay Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay ku xidhnaan doonta qaab-dhismeedka fulinata ee hoos ku xusan;

### 3.1 Qaab-dhismedka Sharciga

1) **Dastuurka Kumeel Gaarka ah**

Sharciyadda kormerka iyo qiimeynta waxaa laga soo qaatay qodobka 69$^{aad}$ ee dastuurka kumeel gaarka ah, kaas oo qeexaya in ay tahay waajibaadka Golaha Shacabka in uu la xisaabtamo, kormeero hay'adaha qaranka iyo in la xaqiijiyo fulinta xeerarka dalka.

2) **Nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladadda**

Ballan qaadka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku dhaqanka nidaamka maaliyadda waxaa muujinayo hagaajinta ay ka sameysay dhanka maareynta maaliyadda dowladda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa dejisay nidaamka maareynta maaliyadda dowladda ee loo yaqaanno (PFM) kaas oo dhaliyay qorsho howleeedyo muddada u dhaxeyso 2021-2024. Qorshahan ayaa dejiyay hagaajinta dhabta ah ee loo baahanyahay si loo helo ku dhaqan nidaamka maareynta maaliyadda sare.

Marka la dejinayay qorshaha, Wasaaradda Maaliyadda ayaa xaqiijisay in ay ka wada qeyb galaan dhammaan waaxyaha dowladda ee ay khuseyso iyo bahda horumarinta ka taageerta Soomaaliya. Tani waxa ay horseedday in la helo qorshe dhameystiran iyo mudnaanta arrimaha loo baahan yahay in wax laga qabto. Sidoo kale, iyada oo ay hoggaamineyso Wasaaradda Maaliyadda, fulinta qorshahaas ayaa xoojinaya xiriirka Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada, dhismaha aas-aas adag oo ku aaddan in Soomaaliya yeelato nidaam maaliyadeed federaal ah mustaqbalka dhow.[3]

- **Daah-furnaanta iyo Isla xisaabtanka (Accountability and Transparency):** dhammaan Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) dowladda iyo daneeyayasha bahda horumarinta ayaa lagula xisaabtami doona natiijooyinka horumarinta la isku raacay ee ku saleysan Qorshaha-Horumarinta Qaranka, siyaasadaha,

[3] https://mof.gov.so/the-ministry/pfm-reforms

barnaamijyada iyo mashaariicda.

- **Anshaxa iyo Hufnaanta (Ethics and integrity):** dhammaan WW&H ee dowladda waxa ay dhiirigelinayaan mabad'iida dhex-dhexaadnimo iyo u hoggaansanaanta heerarka caalamiga ah iyo cabirrada natiijooyinka horumarka, iyo in loo isticmaalo howlaha kormeerka iyo qiimeynta si ay ku dheehantahay hufnaan iyo madaxbanaani.

### 3.2 Fulinta, Kormeerka iyo Dib-u-eegista

Fulinta siyaasadda waxaa mas'uul uga noqonaya Dowladda Soomaaliya Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH. Sidoo kale, waxaa loo baahanyahay taageerada iyo ballanqaadka dhammaan daneeyayasha nidaamka kormeerka iyo qiimeynta si fulinta siyaasaddani u noqoto mid guuleysata. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa hubin doonta fulinta siyaasadda iyada oo si dhow u kormeeri doonta in kormeerka iyo qiimeynta si qumaati ah loo qaatay marka ay timaado barnaamijyada guud, si waafaqsan ujeeddooyinka siyaasadda. Waaxdu waxa ay dejin doonta tilmaamaha iyo heerka ugu yar ee lagu fulin doono kormeerka, qiimeynta iyo wax-qabadka si loo xaqiijiyo hagaajinta joogtada ah ee natiijooyinka horumarka.

Dhammaan mashariicda iyo barnaamijyada waa in ay lahadaan miisaaniyad lagu qabanayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta, ka hor inta aan la ansixin mashariicdaas ama barnaamijyadaas. Shuruudaha ugu yar ee kormeerka iyo qiimeynta waa in ay ka mid noqdaan in howlaha ay yeeshaan tilmaammo (indicators) la cabbiri karo, la gaadhi karo, ku habboon isla markaana muddeysan (SMART) marka la fulinayo iyo natiijada intaba; xog gundhig ah oo ku saabsan tilmaamana mashaariicda ama barnaamijyada; iyo eegista lagu sameynayo qiimeynta la cayimay. Qorshaha ayaa tixgelin doono dhammaan arrimaha kale ee ku xusan siyaasaddan.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa mari doonta labo dib-u-eegis iyada oo loo marayo nidaamka ka wada qeyb qaadasho, marka ay dhammaato shan (5) sano kasta, taas oo waafaqsan fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka. Kan hore ayaan noqonaya eegista muddada dhexe (mid-term review) labao sano iyo badh kasta iyo kan kale oo ah sanadka ugu dambeeya (final term review) ee shan sano kadib.

Qiimeynta muddada dhexe waxa ay diiradda saari doonta horumarka laga gaaray fulinta siyaasaddan iyo in la qiimeeyo in ay saxan tahay iyo in kale guud ahaan jihada istiraatiijiga ee ay siyaasaddu ku socoto. Sida daradeed, qiimeynta muddada dhexe waxaa loo naqshadeyn doona in ay wax ku biiriso muddada ka dhiman fulinta siyaasadda iyo hagaaajinta lagu talo bixiyay la dabbaqo, meelaha lagama maarmaanka ah. Qiimeynta ugu dambeyso ayaa la sameyn doona dhamaadka shanta (5) sano waxaana diiradda lagu saari doona saameynta fulinta siyaasaddan.

## 4. Wada Shaqeynta Hay'adaha

Si loo fuliyo siyaasadda, kaalimaha iyo mas'uuliyadaha dowladda Fedeeraalka iyo Dowlad Goboleedyada waxa ay noqonayaan sida soo socota:

### 4.1 Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka sare

Baarlamanka Soomaaliya ayaa:

1) Ansixin iyo meelmarin Dhaqan gelin doona shuruucda ku habboon ee kaabaya fulinta siyaasadda dowladda ee kormeerka iyo qiimeynta;
2) Ku kor-joogteeyn doona laanta fulinta dhaqangelinta siyaasadda qaran ee kormeerka iyo qiimeynta;
3) U isticmaalka maclumaadka laga helo kormeerka iyo qiimeynta si loo gaaro go'aanno ku saleysan maclumaad dhab ah, lagulana xisaabtamo dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn isticmaalka deeqaha iyo kheeyraadka;
4) Kormeer iyo qiimeyn ku sameyo siyaasadaha, qorshayaasha, barnaamijyada iyo mashariicda iyada oo ay gudanayaan guddi hoosaadyada baarlamaanka waajibaadkooda.
5) Dib-u-eegis ku sameeya isla markaana ansixiya miisaaniyadda kormeerka iyo qiimeynta ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha dowladda marka lasoo bandhigo miisaaniyadda qaranka;
6) Dib-u-eegis ku sameeya warbixin sanadeedka ku aaddan heerka dhaqangelinta siyaasadaha, iyo qorshayaasha dowladda sida ay soo diyaariso Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, lana soo mariyay Golaha Wasiirrada si loo xaqiijiyo loona ansixiyo.

## 4.2 Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada ayaa:

1) Ansixin ama diidi doona fulinta qodobbada lagu xusay siyaasaddan Qaran;
2) Kormeeri doona fulinta qodobbada lagu xusay siyaasaddan;
3) Bixin doona jiho-siyaasadeed ka dhalata talo-bixinnada warbixinnada natiijooyinka kormeerka iyo qiimeynta;
4) Bixin doona tilmaamaha fulinta siyaasaddan;
5) Adeegsan doona warbixinta laga helo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dowladda si loo qaato go'aanno ku saleysan xogo xaqiiqo ah ..

## 4.3 Wasaaradda Qorsheytna, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (Waaxda Kormeerka iyo Qiimeyta)

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeeynta ayaa:

1) Qaadan doonto dowr hoggaamineed, tilmaami doonta howlaha farsamo, iskuduwidda iyo fulinta howlaha kormeerka iyo qiimeynta sida ku cad siyaasaddan;
2) Taageeri doonta howlgelinta waaxyo ama unugyo kormeer iyo qiimeyn ee laga hirgeliyo heerarka kala duwan ee dowladda sida Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha;
3) Leh mas'uuliyadda guud iyada oo la wada shaqeyn doonta dhammaan WW&H dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo naqshadeeyo, la iskugu duwo isla markaana loo sameeyo qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicda laga fuliyo dalka Soomaaliya.
4) Dhiirigelin iyo taageero siin doonta tabo-barrada iyo dhisidda karaanka kormeerka iyo qiimeeynta dowladda Soomaaliya heerar keeda kala duwan;
5) Xaqiijin doonta in dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn u hoggaansamaan, horumariyaan isla markaana fuliyaan nidaam kormeer iyo qiimeyn shaqeynaya iyo in si joogta ah u ay soo saarto, baahiso warbixinno ku jaan go'an siyaasaddan;

6) Si dhow ula shaqeyn doonta daneeyayaasha ay khuseyso kormeerka iyo qiimeynta, horumarin doonta isla markaana dhidibbada u aasi doonta nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka.
7) Dhiirigelin doonta horumarinta dhaqan dalbanaya, isla markaana isticmaalaya xogta iyo maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta.
8) Marka la sameeynayo qiimeyn, waaxdu waxa ay iskugu yeeri doonta daneeyayaasha si loo siiyo kulan-howleed (workshop), si loo xaqiijiyo loona baahiyo natiijada qiimeynta;
9) Kormeeri doonta isla markaana xaqiijin doonta u hoggaansanaan dhab ah iyo in siyaasaddan ay ka fuliyaan hay'adaha dowladda iy o kuwa aan dowliga aheyn guud ahaan dalka iyaga oo loo gudbin doono Golaha Wasiirada warbixin sanadeedka u hoggaansanaanta siyaasaddan.
10) U isticmaali doonta macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta ee la yaal WW&H si loogu qaato go'aanno ku dhisan xaqiiqada.
11) Ka qayb ahaanshiyaha Waaxda kormeerka iyo qiimaynta qorsheynta barnaamijyada, siyaadaha iyo mashaariicda dalka si ay u sameyso kormeer iyo qiimaynn joogta ah oo ku salaysan qorshayaasha ay sida qotada dheer u la socdeen.
12) In ay waaxda diyaariso tilmaamayaasha iyo caddaymaha

### 4.4 Wasaaradaha Maaliyaddda (Heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed).

Wasaaradaha Maaliyadda ayaa;

1) Taageerida waaxyaha ama unugyada la aas-aasay ee ka shaqeeya kormeerka iyo qiimeynta oo ka jira dhammaan WW&H ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed;
2) Xaqiijin doona in lacago ku filan loogu qoondeeyo miisaaniyadda qaranka ee sanadlaha ah iyo miisaniyadda Dowlad Goboleed walba si loo taageeri howlaha kormeerka iyo qiimeynta , si waafaqsan siyaasaddan;
3) Dhiirigelin doona dhaqanka kormeeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada xaqiiqada ah si loo qorsheeeyo, loo diyaariyo isla markaana loo qoondeeyo miisaaniyadda dowladda.
4) U isticmaali doona macluumaadka laga helo nidaamka dowladda ee kormeerka iyo qiimeynta si loogu qaato go'aanno ku saleysan xaqiiqada.

### 4.5 Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) Federaalka ah

WW&H Federaalka ah ayaa;

1) Xaqiijin doona unkidda waaxyaha ama unugyada kormeerka iyo qiimeynta in ay helaan shaqaale iyo miisaaniyad ku filan si ay u gutaan howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xir waxtar leh oo u dhaxeeya qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta wasaaradaha iyo wasaaradaha dhiggooda ah ee heer Dowlad Goboleed iyo hay'adaha kale ee dowliga ah.

3) Fududeyn doona kobcinta karaanka shaqaalaha iyada oo la raacayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijooyinka xaqiiqada ah;

4) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna baahin doona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta (si seddex biloodle ah ama si sanadle ah) sidoo kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo sidoo kale in ay hubiyaan in agabka aqoonta laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda;

5) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona waxtarka fulinta siyaasaddan;

6) Isku howli doona kormeerka siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ka socda qeybaha ay mas'uulka ka yihiin iyo in Dowlad Goboleedyada ay kala shaqeeyaan siyaasaddan Wasaaradaha ay khuseyso iyo daneeyayaasha kale;

7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta kaas oo ka kooban daneeyayaasha muhiimka ah;

8) Isticmaali doono macliumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.

**4.6 Wasaaradaha Qorsheynta ee Dowlad Goboleedyada (Waaxyaha mas'uulka ka ah howlaha Kormeerka iyo Qiimeynta)**

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa;

1) Bixin doonto dowr hoggaamineed iyo tilmaamidda heerka farsamo si la'iskugu duwo loogana fuliyo siyaasaddan heer Dowlad Goboleed.

2) Aas-aasi doonta waaxyo ama unugyo ka shaqeeya kormeerka iyo qiimeynta oo ka jira dhammaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed;

3) Taageeri doonta waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta in ay la shaqeeyaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo fuliyo howlaha kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicda laga fulinayo heer Dowlad Goboleed;

4) Abuuri doonta isku xirka qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta Wasaaradaha Dowlad Goboledyada iyo geeddi-socodka howlaha, si waafaqsan siyaasaddan Qaran;

5) Isku duwi doonta isla markaana qaban doona howlaha kormeerka iyo qiimeeynta barnaamijyada iyo mashariicda laga fulinayo heer Dowlad Goboleed;

6) Dhiirigelin doonta isla markaana taageri doona howlaha tabo-barka iyo karaan dhiska la xiriira kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed.

7) Xaqiijin doonta in dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn u hoggaansayihiin siyaasaddan, horumariyaan nidaam kormeer iyo qiimeyn shaqeynaya iyo in si mar-mar ah ay usoo saaraan una baahiyaan warbixinnada, si waafaqasan siyaasaddan Qaran;

8) Si dhow ula shaqeyn doonaan waaxyaha kormerka iyo qiimeynta iyo daneeyayaasha kale ee muhiimka ah, taageeri doonaan xoojinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta qaranka;

9) Dhiirigelin doonta horumarinta dhaqanka dalbashada iyo isticmaalka xogta iyo maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed;

10) Kormeeri doonta isla markaana xaqiijin doona u hoggaansanaanta iyo ka fulinta siyaasaddan dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga ahyen ee heer Dowlad Goboleed iyada oo la soo gudbinayo warbixin sanadeedka u hoggaansanaanta ee Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta;

11) Isticmaali doonta warbixinnada kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan

xaqiiqada.

### 4.7 Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) heer Dowlad Goboleed;

WW&H ee heer Dowlad Goboleed ayaa;

1) Xaqiijin doona in laga unko waaxyaha/unigyada kormeerka iyo qiimeynta dhammaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed, dowladaha hoose (gobollada iyo degmooyinka) iyada oo la siinayo shaqaale iyo miisaaniyad ku filan gudashada howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xirka u dhaxeeya qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta Dowlad Goboledyada iyo geeddi-socodka howlaha lamidka ah ee kala dhexeeya Dowladda Federaalka iyo waaxyaha ka mas'uulka ah kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed;
3) Fududeyn doona howlaha karaan dhiska ee dhamaan shaqaalaha iyada oo la marayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada;
4) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna baahin doona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta (si seddex biloodle ah ama si sanadla ah) sidoo kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo agabka aqoonta in laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda;
5) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona waxtarka fulinta siyaasaddan;
6) Isku howli doona kormeerka siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ka socda qeybaha ay mas'uulka ka yihiin iyo in Dowlad Goboleedyada ay kala shaqeeyan siyaasaddan wasaaradaha ay khuseyso iyo Daneeyayaasha kale;
7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta kaas oo ka kooban Daneeyayaasha muhiimka ah;
8) Isticmaali doonta macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aanno qaadashada ku dhisan xaqiiqada.

### 4.8 Dowladaha Hoose, Gobollada iyo Degmooyinka

Dowladaha Hoose ayaa;

1) Xaqiijin doona in laga unko waaxyaha/unigyada kormeerka iyo qiimeynta iyada oo la siinayo shaqaale iyo miisaaniyad ku filan gudashada howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xirka u dhaxeeya qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta gobollada iyo degmooyinka iyo geeddi-socodka howlaha lamidka ah ee kala dhexeeya heer dowlad goboleed;
3) Fududeyn doona howlaha karaan dhiska ee dhamaan shaqaalaha iyada oo la marayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada;
4) Si joogto ah uga uruurin doona xogta iyo maclumaadka miyiga iyo magaalooyinka goobahaas;
5) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna baahin doona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta sidoo

kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo in la hubiyo in agabka aqoonta laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda iyo daneeyayaasha kale ee muhiimka ah;


6) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona in siyaasaddan laga fuliyo gobollada iyo degmooyinka;
7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta ee heer gobol iyo degmo kaas oo ka kooban Daneeyayaasha muhiimka ah;
8) U isticmaali doona macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.


## 4.9 Hay'adaha aan Dowliga Aheyn

### 4.9.1 Ururada Bulshada Rayidka, Bahda Horumarinta iyo Ganacsatada;

1) Waa in ay waafajiyaan barnaamijyadooda Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo in la xaqiijiyo in barnaamijyada iyo mashaariicdu ay u hoggaansanyihiin waajibaadka dowladda ee warbixinnada;
2) In ay bixiyaan xog tayo leh isla markaana waqtigeeda la joogo oo ku aaddan fulinta iyo waxqabadka barnaamijyada iyo mashaariicda;
3) Waa in ay ka qeyb qaataan dejinta qorshaha qaranka, geeddi-socodka kormeerka iyo qiimeynta ee heerarka kala duwan ee dowladda;
4) Waa in ay u hoggaansamaan ayna taageeraan fulinta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;
5) Waa in ay taageeraan howlaha dowladda ee ku aaddan dedaallada karaan dhiska si loo adkeeyo dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta;
6) Waa in ay isticmaalaan macliumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.
7) Waa in ay si hufan uga qeyb galaan howlaha Kooxda Shaqada Farsamada ee Kormeerka iyo Qiimeynta oo ay aas-aastay Waaxda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta.

## 4.10 Qaab dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka






### 4.11 Maaliyadda

Hirgelinta Siyaasadda Qara ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxtar leh waxa ay u baahantahay maaliyad ku filan isla markaana la joogteyn karo si loo gaaro ujeeddooyinka iyo bartilmaameedyada siyaasaddan. Sida daradeed, kormeerka iyo qiimeynta waa in uu ka mid noqdaa heerarka qorsheynta iyo miisaniyadda siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda WW&H ee heer Federaal iyo kuwa heer Dowlad Goboleed ayaa u qoondeyn doona miisaaniyad ku filan howlaha kormeerka iyo qiimeynta ee heer walba.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa uu ujeedkeeda yahay in miisaaniyad ku filan loo qoondeyo Kormeerka iyo Qiimeynta mashariicda dowladda, barnaamijyada iyo siyaasdaha. Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxay kalo uu ujeedkeeda yahay in ugu yaraan boqolkiiba shan (5%) loo qoondeeyo Komeerka iyo Qiimeynta miisaaniyadda mashariicda dowladda iyo kuwa hay'adaha horumarineed si loo sameeyo kormeer, dab-gal iyo qiimeyn. Waxa la sadaalinaya in qoondadani ay xoojin doonto daah-furnaan, isla xisaabtan iyo in miisaaniyadda lagu saleeyo waxqabadka iyo in sare u qaaddo go'aan qaadashada ku saleysan xaqiiqada ee heerarka kala duwan ee hay'adaha dowladda

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa mas'uul ka noqon doonta maareynta isla markaana sinaan ugu

qeybin doonta 5% waaxyaha/unugyada kormeerka iyo qiimeynta ee WW&H ee Dowladda Federaalka ah. Waaxda ayaa si daah-furan ugu soo bandhigi doonta isticmaalka miisaaniyadda sanadlaha ah ee waaxda kormeerka iyo qiimeynta hay'adaha dowladda ee ay khuseyso.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay sidoo kale rajeyneysa in dhammaan mashariicda, siyaasadha iyo mashariicda hay'adaha aan dowliga aheyn ay lahaadan miisaaniyad loo qoondeeyay howlaha kormeerka iyo qiimeynta ee barnaamijayada, siyaasadaha iyo mashariicda la hirgeliyay si sare loogu qaado isla xisaabtanka iyo hagaajinta bixinta adeegyada shacaba Soomaaliyeed la siinayo.

## 5. Shuruudaha Siyaasadda

### 5.1 Shuruudaha Kormeerka

Guddiga Kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga iyo Horumarinta (OECD) ayaa ku qeexay kormeerka sida "Howl socota oo isticmaaleysa nidaam is-xig-xiga oo lagu uruurinayo xog ku aaddan tilmaamo cayiman si loo siiyo maamulka iyo Daneeyayaasha muhiimka ah ee mashariicda horumarineed ee socda taas oo tilmaameysa xaddiga horumarka iyo guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo sidoo kale horumarka isticmaalka lacagaha loo qoondeeyay". (OECD, 2002)[4]. Sida daraadeed, siyaasaddani waxa ay u baahantahay geeddi-socod joogto ah oo lagu uruurinayo laguna diiwaangelinayo maclumaad si loo raad-raaco horumarka laga gaaray natiijada ay gaarayaan dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo go'aamiyo horumarka fulinta howlaha, guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo isticmaalka lacagaha. Kormeerku waxa uu ka dhici karaa heer walba, oo ay kamid yihiin dowladaha hoose, Dowlad Goboleedyada, Federaalka iyo sidoo kale heer mashruuc ama barnaamij.

Iyada oo la eegayo jawiga guud ee Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta, siyaasaddu waxa ay dejineysaa shuruudaha kormeerka iyo qiimeynta ee soo socda;

1) Dowladda iyo hay'adaha la shaqeeya ayaa dejin doona una bandhigi doona hay'adaha dowladda ee ay khuseyso iyo fulinta qorsheyaasha heer hay'adeed ama waaxyaha iyo in la'is waafajiyo miisaaniyadda iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka, kaas oo qeexaya howlaha ay tahay in la qabto, istiraatiijiyadaha miro dhalka ah, kheyraadka loo baahanyahay, natiijada kormeerka iyo qiimeynta iyo qaab-dhismeed muujinayo howlaha gelaya, wax soo saarka iyo sidoo kale tilmaamaha guulaha.
2) Si loo fududeeyo kormeerka iyo warbixinnada, WW&H ayaa sameyn doono qorshaha kormeerka iyo qaab-dhismeedka iyo howlaha kormeerka oo mari doona heerarka soo socoda:

- **Kormeerka howlaha galo:** in la go'aamiyo in maaliyadda iyo qalabka la geliyay loo isticmaalay si waafaqsan qoondadii iyo qorshihii loogu tala galay;
- **Kormeerka wax soo saarka:** tan ayaa lagu sameyn doona iyada oo la eegayo qoraallada ka faalloonayo horumarka iyo booqashada goobaha howlaha ka socdaan si loo xaqiijiyo dhab ahaan wax soo saarka marka lala eego bartilmaameedyada;
- **Natiijada Kormeerka:** in la qiimeeyo natiijada iyo ujeeddooyinkii la gaadhay;
- **U hoggaansanaanta Kormeerka** kormeer lagu sameeynayo xeerarka dowladdad iyo mudnaantooda.

[4] Based on OECD (2002), Glossary of Key Terms in Evaluation and Results Based Management, OECD, Paris.

3) Waaxda ama unigyada kormeerka iyo qiimeynta, iyaga oo kaashanaya Daneeyayaasha ay khuseyso, ayaa sameyn doona tilmaamaha kormeerka iyo qiimeynta iyaga oo bixin doona xogta gundhigga u ah iyo bartilmaamaha.

4) Siyaasaddani waxa ay soo bandhigeysa hannaanka qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta isku xiran taas oo loo isticmaali doono in lagu cabbiro waxqabadka ku saleysan tiir-tilmaameedyada ee ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka 9[aad] (QHQ9).

5) Si loo taageero fulinta howlaha kormeerka iyo qiimeynta qaranka, dhamaan WW&H ayaa abuuri doono isla markaana howlgelin doona unugyada kormeerka iyo qiimeynta si loo fuliyo howl-maalmeedka, loo taageero loona kormeero fulinta hannaanka kormeerka iyo qiimeynta qaranka.

6) Dhammaan WW&H ayaa qaadan doono nidaamka maareynta xogta ee ku dhisan tiknoolojiyadda casriga ah si loo uruuriyo, nidaamiyo, isla markaana loo falanqeeyo xogta kormeerka uu soo saaray iyo sidoo kale in la qeexo warbixinnada horumarka ee joogtada ah.

7) Waaxda iyo unigyada kormeerka iyo qiimeynta ayaa lahaanaya mas'uuliyadda kowaad marka ay timaado qabashada howlaha kormeerka ee la xiriira hay'adahooda, si kastaba ha ahaate, waaxda mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta qaranka waa tan qaranka taas oo leh xuquuqda qabashada howlaha kormeerka aan muddeysneyn ee barnaamijyada iyo mashaariicda taas oo laga hirgelinayo in ka badan hal (1) Dowlad Goboleed.

8) Hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa fududeyn doona howlaha kormeerka ee la xiriira barnaamijyada iyo mashaariicda ay fuliyaan iyada oo loo marayo nidaam kormeer iyo qiimayn Wadajir ah.

9) Dhammaan WW&H, iyaga oo la shaqeynayo waaxyaha mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta, ayaa horumarin doona isla markaana u hoggaansami doona soo saarista warbxinnada muddeysan ee soo socda;

- Warbixinnada seddex billaha ah
- Warbixinnada sanadlaha ah

10) Warbixinnada kormeerka ayaa loo isticmaali doona wax ka barashada hagaajinta fulinta barnaamijyada iyo go'aan qaadashada. Warbixinnada kormeerka ayaa siin doona barnaamijyada ahmiyadaha leh isla markaana la wadaagi doona wasaaradaha ay khuseeyso, Golaha Wasiirrada iyo Golaha Shacabka si ay uga qaataan maclumaadka iyo tallabooyinka ku habboon.

11) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo kaashaneysa waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta Dowlad Goboleedyada, wadatashina la sameyneysa Daneeyayaasha kale ayaa horumarin doonto tilmaamaha iyo heerarka kormeeerka, hab-raacyada lagu shaqeynayo, qaab-dhismeedka iyo qorsheyaasha kormeerka, qalabka iyo qaababka warbixinnada.

### 5.2 Shuruudaha Qiimeynta

Guddiga Kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga iyo Horumarinta (OECD) ayaa qeexa kormeerka sida "howl socota oo isticmaaleysa nidaam is-xig-xiga oo si ujeeddo leh loogu qiimeynayo mashaariicda, barnaamijyada iyo siyaasadaha socda iyo kuwa la dhameystiray, iyada oo laga eegayo naqashaddooda, fulinta iyo natiijooyinka la gaadhay. Ujeedka ayaa ah in la go'aamiyo ku habboonaanta iyo fulinta ujeeddooyinka, hufnaanta horumarka, waxtarka, saameynta

iyo joogteynta howlahaas" (OECD, 2002)[5] .

Marka laga hadlayo Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeeynta Qaranka, siyaasaddu waxa ay dejineysa shuruudaha qiimeynta loo baahanyahay ee soo socda;

1) **Qorshaha qiimeynta qaranka iyo warbixinnada qiimeynta:** Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay sameysaa qorshaha 5ta sano ee qiimeynta qaranka oo ku dhisan Qorshaha Horumarinta Qaranka iyada oo kaashaneysa WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn isla markaana ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada.
2) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa fulin doonta howlaha qiimeynta ee heer Federaal sida ku xusan siyaasaddan iyada oo waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta heer Dowlad Goboleed qaban doonan howlaha ku jaan-go'an Dowlad Goboleedkooda si waafaqasan qodobka 3.2 ee siyaasaddan.
3) Si dib-u-eegis loogu sameeyo isla markaana loo bixiyo talo siyaasadeed iyo dhinacyda kala duwan, dhammaan WW&H ayaa fududeyn doona qiimeynta howlaha sida ay iskugu raaceen waaxyaha mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta.
4) Qiimeynta ayaa noqon karta mid gudaha ah ama mid dibedda ah iyada oo ay ku xirantahay ujeeddooyinka ama sida ay u go'aamiyaan waaxyaha isku duwidda.
5) Siyaasaddani waxa ay soo bandhigeysa hannaanka qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta isku xiran ee loo yaqaanno (NIMEF).
6) Waaxyaha mas'uulka ka ah qiimeynta waa in ay xaqiijiyaan in miisaaniyad ku filan loo qoondeeyay qiimeynta sida ay tilmaameyso siyaasaddan.
7) Siyaasaddani waxa ay ka dooneysa Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH iyo waaxyaha dhiggeeda ah ee Wasaaradaha Dowlad Goboleeedyada in ay diyaariyaan isla markaana ay qabtaan qeybaha iyo noocyada qiimeynta ee soo socoda;

- **Qiimeynta ka horreysa (Ex ante evaluation):** Qiimeyntani waxaa la sameynayaa ka hor inta aanan siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca la fulin si loo ogaado naqshadda howlaha, loo helo tilmaamaha gundhigga ah, bartilmaameedka iyo natiijooyinka la filayo. Qiimeynta noocan ahi waxa ay wadataa daraasad gundhig ah iyo qiimeynta baahida jirta;
- **Qiimeynta Geeddi-socodka (Process evaluations):** Qiimeynta geeddi-socodka waxa ay diiradda saareysa waxa la gelinayo howlaha iyo tillaabooyinka la qaadayo waxaana ka mid ah; qiimeynta muddada dhexe iyo qiimeynta joogtada ah si loo hagaajiyo tillaabooyinka isla markaana ay wax tar ugu noqoto howlaha muddada dhiman;
- **Qiimeynta dambe (Ex post Evaluations):** Qiimeynta ayaa ah mid kooban si go'aan looga qaato wax soo saarka iyo saameynta howlaha;
- **Qiimeynta Sanadihii hore (Meta Evaluations):** dulmarka qiimeyntii hore ee lagu sameeyo howlaha la midka ah ee la qabanaya sanado badan.

### 5.2.1 Tilmaamaha lagu dooranayo qiimeynta howlaha

Qiimeyntu waa in marka hore ay tixgelisaa shuruudaha soo socda isla markaana ay go'aamisaa qaybaha ahmiyad ballaaran

[5] Based on OECD (2002), Glossary of Key Terms in Evaluation and Results Based Management, OECD, Paris.

u leh shaqada, marka la eego marxaladda guud iyo in warbixinnada qiimeynta ay si qayaxan ku xusan shuruudaha lagu saleeyay qiimeynta;

1) **La xiriira (Relevance):** Qiimeyntu waa in ay sharraxdaa xaddig howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca ay ula xiriiraan baahida iyo ahmiyadaha Ummadda Soomaaliyeed iyo in qiimeyntu ay waafaqsan tahay siyaasadaha horumarinta qaranka iyo himilooyinka deeqbixiye yaasha. Intaa waxaa dheer, qiimeynta waa in ay sharraxdaa xaddiga howlaha mashruuca iyo wax soo saarkiisaba ay ugu jaan go'an yihiin guud ahaan yoolka mashariicda.
2) **Waxtarka (Effectiveness):** Qiimeynta waa in ay eegto isla markaan bixisaa xaddiga ay howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca uu gaaray ama la filayo in uu gaaro, ujeeddooyinka la qorsheeeyay iyo arrimaha saameynta ku leh ama caqabad ku ah gaarista ujeeddooyinka howlaha.
3) **Beeqaamin (Efficiency):** Qiimeynta waa in ay eegto isla markaan bixisaa xaddiga loogu isticmaalay kheyraadka ugu yar (lacag, dad, waqti iyo agab) si loo gaaro wax soo saarka ugu badan. Sidoo kale waxa ay qiimeyn doonta xaddiga howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca uu ugu guuleystay natiijooyinka sida ugu macquulsan/raqiisan.
4) **Saameynta (Impact):** Qiimeyntu waa in ay go'aamisaa in howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca ay saameyn toosan ama mid dadban; taban ama togan, wanaagsan ama xun ku leedahay nolosha dadka Soomaaliyeed.
5) **Joogteynta (Sustainability):** Qiimeynta ayaa tibaaxi doonta xaddiga faa'iidada howlaha siyaasadda, mashruuca ama barnaamijka usii socon doonaan kadib marka deeqaha howlahaas joogsadaan. Qiimeyntu waa in ay cabbirtaa heerka dhaqaale, farsamo, iyo jawiga joogteynta siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca.

### 5.2.2 Heerarka Qiimeynta

Shuruudaha qiimeynta ee siyaasaddan waa in ay la kulmaan heerarka soo socda;

1) **Isticmaalka (Utility):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeyo waa in loo qorsheeya isla markaana loo fuliyaa iyada oo la raacayo ujeedka mabad'iida guud ee siinta maclumaadka looga baahanyahay dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada daneeyayasha kala duwan si ay go'aanno masiiri ah ugu qaataan,
2) **Saxnaanta iyo Kalsoonida (Accuracy and credibility):** Hanaanka qiimeynta iyo natiijadiisaba waa in ay noqdaan kuwo sax ah isla markaana lagu kalsoonaan karo. Xogta la uruuriyay waa in ay noqotaa mid sugan raacsanna nidaamka cilmi baadhista, sidoo kale falanqeynta iyo warbixinnada waa in ay ku saleysnaadan xog sax ah, ansaxsan isla markaana lagu kalsoonaan karo.
3) **Suurtogalnimada (Feasibility):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in ay noqotaa mid wax-ku-ool ah iyo in ay u qalanto waqtiga, lacagta iyo cududda shaqaale ee la geliyay.
4) **Ka wada qeyb qaadasho (Participatory):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in loo fuliyaa qaab ku saleysan ka wada qeyb qaadasho kuna dheehantahay daah-furnaan. Dhammaan qiimeynta siyaasadaha iyo barnaamijyada daneeyayaasha waa in lagala tashada, lagana qeyb geliyaa inta lagu gudo jiro geeddi-socodka qiimeynta iyada oo la siinayo maclumaad ku filan oo ku saabsan qiimeynta iyo cawaaqibta ka dhalan karta. Sidoo kale waa in la helaa afkaartooda ku aaddan naqshadeynta iyo fulinta siyaasadaha, iyo barnaamijyada.
5) **Habboon (Propriety):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in loo maraa

sifo sharci ah isla markaana anshax ku dheehantahay taas oo waafaqsan anshaxa cilmi barista iyo xeerka anshaxa xirfadleyda sameeya baaritaannada.

6) **Dhex-dhexaadnimo (Impartiality)**

### 5.3 Shuruudaha Xiriirka Dadweynaha iyo Warbixinnada.

#### 5.1.1. Istiraatiijiyadda Xiriirka Dadweynaha

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay diyaarisa istiratiijiyad xiriir dadweyne oo looga gol-leyahay in dhidibbada loogu aaso hanaanka kormeerka iyo qiimeynta, in la dhiirigeliyo xoojinta dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta iyo sidoo kale in la dhiirigeliyo dhaqangelinta siyaasaddan. Istiratiijiyaddas waa in ay ku jirtaa nidaamka jawaab-celinta, baahinta maclumaadka ee heerarka kala duwan iyo in Daneeyayaasha dhexdooda iyo sidoo kale in ay fududeyso wacyigelinta, u qareemidda iyo awood siinta hay'adaha si loo muujiyo wax soo saarka iyo natiijada kormeerka iyo qiimeynta.

#### 5.3.2 Shuruudaha Warbixinnada

Dhammaan hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheyn waxa laga doonaya in ay soo gudbiyaan wabixinnada seddex billaha ah, kuwa sanadka bartamihiisa ah iyo kuwa sanadlaha ah ee ku aaddan hirgelinta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka ama waafaqsan heerarka, hababka iyo muddada warbixinnada ee ay dejisay Waaaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH si sax ah isla markaana aan ka dib-dhaceynin muddadii loogu talagalay in la soo saaro warbixinnada. Hababka xog uruurinta, falanqeynta iyo warbixinnada waxaa dejin doona Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo lagala tashanayo WW&A iyo hay'adaha aan dowliga aheyn.

Si loo wadaago warbixinno iyo maclumaad waqtiyeysan waa in lagu baahiyaa nidaamka ku dhisan tikoonolojiyadda ay wada arki karaan dhamaan Daneeyayaasha, dadweynaha iyo inta ay khuseysana ay ka bixin karaan faallo. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa abuuri doonta nidaam xog-keydiye (database) dhexe ah si, si joogto ah loogu falanqeeyo maclumaadka laguna muujiyo howlaha waxqabadka siyaasadda. Dhammaan WW&A iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa xaqiijin doono in hanaanka warbixinnada lagu shubo, si joogto ah barta xog-keydinta dhexe. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa si joogto ah u diyaarin doonta warbixinnada waxqabadka ee lagu baahiyay xog-keydinta si looga dooda fagaarayaasha kala duwan.

#### 5.3.3 Qaab-dhismeedka Warbixinnada

Si loo xoojiyo loona ballaariyo xiriir dadweyne iyo wadatashi joogto ah oo ka dhexeeya dhammaan Daneeyayaasha, siyaasaddani waxa ay dalbaneysa in la sameeyo warbixinno dhinac walba ah (joog & gudub) dalka gudihiisa si loo xaqiijiyo qorsheynta iyo hirgelinta siyaasadaha, mashariicda iyo barnaamijyada waxtarka leh.

#### 5.3.4. Warbixinnada Gudubka ah

Heer Federaal, Dhammaan WW&A waa in ay usoo gudbiyaan warbixinnada kala duwan Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH. Warbixinnada wasaaradaha waa in ay noqdaan kuwo isku daro maclumaadka laga helo Daneeyayaasha kuwaas oo ay soo gudbinayaan waaxyaha iyo unugyada kormeerka iyo qiimeynta ee wasaaradaha. Waaxda

Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay falanqeysa warbixinnada la soo gudbiyay si loogu gudbiyo Golaha Wasiirrada iyo Golaha Shacabka si ay uga doodaan una qaataan, haddii loo arko muhiim. Warbixinnadan waa in loo isticmaala dejinta siyaasadaha iyo tallabooyinka isla markaana loo isticmaalo qorsheynta iyo dejinda miisaaniyadda.

### 5.3.5. Warbixinnada Joogga ah

Heerka Dowlad Goboleedyada, Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa fududeyn doonta warbixinnada heerka gudubka ah (ee u dhaxeeya WW&H Federaalka ah iyo hay'adaha aan dowliga aheyn) iyo warbixinnada joogga ah (ka soo bilowda degmooyinka, gobollada, Dowlad Goboleedka iyo heer Federaal). WW&H Dowlad Goboleedka waa in ay usoo gudbiyaan warbixinanda waaxda kormeerka iyo qiimeynta ee wasaaradaha qorsheynta Dowlad Goboleedyada, kuwaas oo si joog ah ugu soo gudbin doona warbixinanda Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH si loo soo saaro warbxinta guud ee waxqabadka iyo warbxinnada la xiriira kormeerka iyo qiimeynta. Warbxinnada waa in ay muujinayaan dhammaan maclumaadka laga soo uruuriyay Daneeyayaasha degmooyinka, gobollada iyo heer Dowlad Goboleed.

## 5.4 Barashada iyo Maareynta Aqoonta

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la tashaneysa Daneeyayaasha kale, waa in ay billowda isla markaana fududeysa horumarinta istiraatiijiyadda barashda iyo maareynta aqoonta oo laga hirgelinayo dalka oo qeyb ka ah nidaamka kormeerka iyo qiimeynta la filaayo. Sababo la xiriira barashada iyo maareynta aqoonta dowliga ah iyo midda hay'adaha aan dowliga aheyn, taas oo bixin doonta qiimo isla markaana haajin doonta waxqabadka dhismaha feker, dhaqanka iyo agabka barashada kormeerka iyo qiimeynta iyada uu hadafku yahay in barnaamijyada iyo mashariicda iskula beddelaan hadba duruufaha isbeddelaya, si wax-ku-ool ahna loo cabbiri karo waxtarka barnaamijyada laga fuliyo meelaha adag iyo in la kordhiyo waxtarka iyo hobboonaanta mashariicda si sare loogu qaado barashada iyo sare u qaadidda karaana dadka ee heerarka kala duwan.

Dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn waa in ay:

1) Dhiirigeliyaan dhaqanka barashada iyo u isticmaalka waayo-aragnimada laga kororsaday howlaha si loogu qaato go'aano ku dhisan xaqiiqada;
2) Fududeyaan kulamada aqoon kororsiga, kulan howleedyada/shirarka daneenayasha ku howlan iyo helitaanka aragtidooda ku aadan arrrimaha laga hadlayo;
3) In ay soo saaran aragtidooda la xiriirta saameynta ay yeelatay aqoonta cusub, oo ay ka midka tahay in la diiwaan geliyo waayo-aragnimada laga kororsaday, geeddi-socodka iyo warbixinnada sheegaya guulaha iyo hanaanka ugu fiican.

## 5.5 Shirkadaha iyo xirfadleyda madaxa bannaan ee kormeerka iyo qiimeynta

Waa shirkadaha ama shakhsiyaadka aqoonta u leh kormeerka iyo qiimeeynta iyo kuwa siiya adeegyada madaxa bannaan dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn oo ay ka midka yihiin deeq bixyaasha;

Siyaasaddan waxa ay ka dooneysa shirkadahaas ama shakhsiyaadkaas xirfadleyda ah in ay;

1) Iska diiwaangeliyaan wasaaradda dowladda ee mas'uulka ka ah diiwaangelinta shirkadaha;

2) U hoggaansamaan isla markaana ay taageraan hirgelinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta qaranka, si dhidibbada loogu aaso dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta dalka;
3) a taageeraan dowladda dhinacyada awood siinta, iyada oo laga qeyb qaadanayo madasha iyo goleyaasha barashada ee kormeerka iyo qiimeynta
4) sticmaalan isla markaana ay dhiirigeliyaan isticmaalka hannaanka kormeerka iyo qiimeynta qaranka;
5) U hoggaansanaanta tilmaamaha ay bixiso dowladda iyo heerarka ay dejiso Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la tashaneysa daneeyayaasha muhiimka ah, si loo go'aamiyo heerka shuruudaha dhinacyada kale (third-party) ee kormeerka iyo qiimeynta sida shirkadaha iyo shakhsiyaadka.

### 5.6 U Hoggaansananta Siyaasaddan

Dhammaan WW&H dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn waa in ay u hoggaansamaan tilmaamaha iyo shuruudaha siyaasaddan sida heerarka, habka howlgallada ee ay dejisay Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH taas oo hageysa geeddi-socodka kormeerka iyo qiimeynta. Hadaba si dhidibbada loogu aaso dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta ee dalka iyo in si saxan loo fuliyo isla markaana loo dhaqangeliyo siyaasaddan, dowladda ayaa diyaarin doonta faa'iidooyinka iyo dhiirgelinta ku habboon iyo xayiraadaha ka dhasha u hoggaansanaanta iyo u hoggaansanaan la'aanta siyaasaddan ee hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn.

#### 5.6.1 Faa'iidada iyo Dhiirigelinta

U hoggaansanaanta shuruudaha ah in loo soo gudbiyo xogta kormeerka iyo qiimeynta, nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka iyo warbixinnada ayaa loo adeegsan doonaa in laga dhigto tix-raaca u hoggaansanaanta iyo qoondeynta kheyraadka/deeqaha. Faa'iidada iyo dhiirigelinta ku habboon ayaa noqon karta;

1) In la siiyo shahaaddo loogu aqoonsanayo u hoggaansame si loo muujiyo u hoggaansanaanta shuruudaha siyaasaddan;
2) In lagu abaal mariyo fursadaha tabo-barrada iyo karaan dhis dheeriga ah, sida safarro dalka dibaddiisa waayo-aragnimo laga soo kororsanayo;
3) Kheyraad lacageed oo ay kamidka tahay qoondada miisaaniyadda oo loo kordhiyo

#### 5.6.2 Xayiraad

Xayiraado lagu soo rogayo cidda aanan u hoggaansamin shuruudaha siyaasaddan ayaa mar walba suurto gal ah, iyada oo ah go'aanka mar walba ugu dambeeya, si loo xaqiijyo u hoggaansanaanta siyaasaddan. Haddaba, xayiraaaha ayaa la fulin doona si loo ilaaliyo hantida dadweynaha iyo adeegyada la siiyo. Iyada oo loo marayo ansixinta Golaha Wasiirrada, waax kormeerka iyo qiimeynta ee (heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed) ayaa la siin doona sharciyad ay ku xayiraan hay'adaha, dowladda iyo kuw aaan dowliga aheyn, kuwaas oo ku guul darreystay u hoggaansamaan siyaasaddan. Xayiraadda waxaa lagu saleyn doona warbixinnada Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, waxaana ka mid noqon kara/doona;

1) Warqadaha Canaanta;
2) Talo soo jeedin ku addan talabooyin laga qaadayo ciddii aanan u hoggaansamin siyaasaddan sida in laga xayiro deeqaha ama laga yareeyo qoondada miisaaniyadda.

## 6 Horumarinta Karaanka

Laga billaabo marka la dhaqangeliyo siyaasaddan, Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la kaashaneysa daneeyayaasha kale, (hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn oo ay kamidka yihiin bahda horumarka), waa in ay qabataa sahan dalka oo dhan ah laga fuliyo kaas oo lagu ogaanayo heerka kormeerka iyo qiimeynta dalka si loo ogaado gaabiska ka jira nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dalka iyo talooyinka muhiimka ah ee loo baahanyahay in tallaabooyin laga qaato si loo xaliyo gaabiskaas.

Sida ku xusan Keyd-Aqooneedka Furan ee Bangiga Adduunka "Waa lama huraan in dal uu sameeyo daraasad lagu ogaanayo heerka kormeerka iyo qiimeynta dalka haddii la rabo in dalkaas uu horumariyo hindiseyaal ku addan mashariic iyo siyaasado lagu hagaajinayo saameynta kormeerka iyo qiimeynta[6]. Daraasaddan ayaa horseedi doonta horumarinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta, kaabeyaasha loo baahanyahay iyo cududda dadka looga baahan yahay heer walba. Intaa waxaa dheer in fulinta hufan ee siyaasaddani ay dalbaneyso nidaam adag, si joogto ah u korinayo karaanka howl-wadeennada dowladda, si loo xoojiyo waxtarka kormeerka iyo qiimeynta.

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la kaashaneysa daneeyayaasha muhiimka ah, waa in ay horumarisaa istiraatiijiyadda qaran ee karaan dhiska hanaanka kormeerka iyo qiimeynta, oo uu ka mid yahay manhaj ku dhisan natiijooyinka daraasada heerka kowaad ee kormeerka iyo qiimeynta qaranka.

Si loo xaqiijiyo dhaqangelinta hufan ee nidaamka qaran ee kormeerka iyo qiimeynta, Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo kaashaneysa hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn, waa in ay horumarisaa karaanka kormeerka iyo qiimeynta ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed. Dedaallada karaan dhiska waxaa kamid ah heerka farsamada, maamulka iyo karaanka hay'adaha ay ku gudanayan waajibaadkooda.

## 7. Saameynta Siyaasaddan ee la Filayo

Siyaasaddan ayaa la filayaa in ay yeelato saameynta soo socota;

1) Dhiirigelinta afkaar iyo fulinta barnaamijyo hufan oo wax tar leh oo ku qottoma go'aanno ku saleysan xaqiiqada;
2) Sare u qaadista isla xisaabtanka, daah-furnaanta marka ay timaado qoondeynta kheyraadka iyo naqshadeynta barnaamijyada iyo fulintoodaba;
3) Sare u qaadista wadashaqeynta ururada bulshada rayidka, ururada aan dowliga aheyn, deeq bixiyaasha caalamiga ah iyo bahda horumarinta;
4) Sare u qaadista u hoggaansanaanta ku dhisan xeerarka dhaqangalka ka ah dalka;
5) Siyaasad waxtar leh, barnaamijyo iyo mashaariicda muhiim-ka ah;
6) Xoojinta nidaam dhexe oo ku aaddan kormeerka, qiimeynta iyo maareynta xogta.

[6] Shepherd, Geoffrey. 2011. Conducting Diagnoses of M&E Systems and Capacities. PREM Notes; No. 16. World Bank, access on January 23rd ,2023 https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/11054